Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

TURVAPAIKKA-, MAAHANMUUTTO- JA KOTOUTTAMISRAHASTO
Euroopan unionin tuella

# Waraysiga magangelyaddoonka ee Hoggaanka socdaalka

Waxaa laguugu yeeray waraysiga magangelyaddoonka ee Hoggaanka socdaalka. Si taxaddar leh u akhri hagistaan, taasoo kuu sheegeysa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga la xiriira waraysiga lagula yeelanaayo. Haddii aad wax su'aal ah ka qabto hagistaan, waxaad su'aashaada u soo jeedin kartaa bilowga waraysiga shaqaalaha Hoggaanka socdaalka.

## Waa maxay ujeeddada waraysiga?

- Waxaad Finland ka codsatay magangelyo. Waraysigan waxaa lagu caddaynayaa sababaha aad iyaga dartoood magangelyada uga codsatay Finland, islamarkaana sababahaas awgood aadan dib ugu laaban karin dalkaagii.
- Waa arrin aad muhiim u ah in aad waraysigaan lagula leeyahay ku sheegto dhammaanba waxyaabaha codsigaagu uu ku salaysan yahay ama asaaska u ah. Haddii ay kugu soo dhashaan waxyaabo kale oo cusub oo aad ku salaynayso codsigaaga waraysigaan kaddib, ama aad doonayso in aad macluumaad cusub ku soo kordhiso waxyaabihii aad hore u sheegtay, waxaad arrinkaas si dhakhso leh ugu soo sheegtaa Hoggaanka socdaalka ama maxkamadda haysa falanqaynta racfaankaaga.
- Waraysiga waxaa lagu falanqaynayaa oo keliya codsiga magangelyaddoonista. Haddii ay Finland joogaan dad ka mid ah xubnaha qoyskaaga, waxaad sharciga degganaanshaha ama ciqaamadda ku codsan kartaa sababta ah xiriirka qoysnimo, waa in aad samaysaa codsiga sharciga degganaanshaha ee gaarka ah, kaasoo ah mid lacag la bixinaayo.

## Waa maxay xuquuqaha aad leedahay waraysigaan dhexdiisa?

- Waxaad xaq u leedahay waraysigaan inta uu socdo, in aad qabsato qareen kaa caawiya arrimaha sharciyada. Qareenku wuxuu kaga soo qaybgali karaa waraysiga adiga rabitaankaaga kuu gaarka ah.
- Waa inaad adigu iskaa u raadsato qareen. Haddii aadan raadsan qareen kula jooga waraysiga, weli waan sii yeelan karnaa waraysiga xittaa iyadoo aanu qareen joogin.
- Waraysiga waxaa jooga turjubaan. Shaqada turjubaanku waa in isagoo aan cidna la jirin uu si dhexdhexaad ah u turjumaa dhammaanba wixii waraysiga dhexdiisa lagu sheego. Turjubaanku wuxuu noqon karaa mid goobta uu waraysigu ka dhacaayo jooga, ama khadka telefoonka ku turjumaaya, ama fiidiyoow ahaan u turjumaaya.
- Qofka waraysiga qaadaaya, turjubaanka iyo qareenka waxaa saaran waajibka ah in ay sirta qariyaan, taasoo loola jeedo in aanay cid kale oo arrinkaan ka baxsan u sheegi karin wixii ay ka maqleen waraysiga dhexdiisa. Arrimaha aad ku sheegeyso waraysiga, waxaa dhici karta in ay saamayn ku yeeshaan falanqaynta codsiyada xubnaha qoyskaaga. Xaaladahaan oo kale waxaan tixgelin gaar ah siin doonnaa arrimahaas xubnaha qoyskaaga. Si kastaba waan ka qarin karnaa wixii aad sheegtay xubnaha qoyskaaga, haddii sheegista arrimahaas ay adiga iyo ehelkaagaba ku keeni karaan dhibaato ama halis. Wixii aragtidaada la xiriira ee arrimahaas ku saabsan waxaad ku sheegi kartaa waraysiga dhexdiisa.
- Dukumintiyada adiga kugu saabsaan asal ahaan waa kuwo sirtoodu qarsoon tahay.

## Waa maxay waajibaadka ku saaran adiga waraysigaan dhexdiisa?

- Waxaa adiga waajib kugu ah in aad sheegto oo aad sharraxaad ka bixiso, waa maxay sababta aad u codsanayso magangelyada. Waa arrin ay dantaadu ku jirto, in aad si xaqiiqda ku salaysan oo run ah u sheegto dhammaanba arrimaha saamaynta ku yeelanaaya waraysiga.
- Sidoo kale waxaa ay dantaadu ku jirtaa in aad sheegto arrimaha adag ama dhibka badan. Waxaana dhici karta in arrimahaasi ay xal muhiim ah u yihiin codsigaaga.
- Haddii aadan xusuusan ama aadan garanayn, ha isku dayin in aad jawaabta adigu iska allifato ama iska hindisto, bixinta macluumaad khaldan waxaa ay daciifineysaa ama hoos u dhigaysaa rumaysashada waxyaabaha aad sheegtay.
- Marka lagu waraysanaayo waxaad sheegtaa macluumaadka aqoonsigaaga shakhsiyadeed magaca iyo taariikhda dhalashada ee saxda ah. Haddii aadan haysan wax dukuminti ah oo lagu caddayn karo macluumaadka aqoonsigaaga shakhsiyadeed, waa inaad sida kuugu suurtaggalsan u raadsataa dukuminti, islamarkaana aad ugu soo gudbisaa Hoggaanka socdaalka. Dukumintiyadaas waxaa ay noqon karaan tusaale ahaan kaarka aqoonsiga ama dukumintiga safarka. Si kastaba Hoggaanka socdaalka kuguma waajibin karo adiga inaad cadddaynta u raadsato qaab khatar gelin kara ammaankaaga ama kan ehelkaaga. Waxaad

hadhoow macluumadka shakhsi ahaaneed ku beddeli kartaa, marka aad keento dukuminti dawladeed la aamini karo oo ku saabsan macluuumaadka shakhsiga.

- Hoggaanka Socdaalka waxaa uu macluumaadka shakhsiyadeed iyo waxyaabaha salka u ah codsigaaga ku kaydinayaa nidaamka falanqaynta xogta ee arrimaha dadka ajnabiga ah, kaasoo ah diiwaanka rasmiga ah ee dowladda.
- In la siiyo hay'adaha dowladda macluumaad shakhsiyadeed aan sax ahayn ama xog aan sax ahayn oo loo gudbiyo diiwaanka dowladda, waa fal-dambiyeed ciqaab lagu mutaysanaayo.
- Waxaad ogaataa in bixinta ama siinta macluumaadka shakhsiyadeed ee khaladka ah, ama qarinta xogtii saxda ahayd, ay hadhoow kugu keeni karto in lagaala noqdo sharcigii oggolaanshaha ahaa ee lagu siiyay, islamarkaana waxaa ay dhibaato ku noqonaysaa oo adkaynaysaa falanqaynta arrimaha kale ee adiga ku khuseeya.

## Sidee ayaa waraysiga loogu soo diyaargaroobayaa?

- Waraysiga kahor soo akhri oo u kuurgal  dhammaan hagista iyo qoraallada ay hawlwdeennada dowladdu ku siiyeen. Waxaa aad muhiim u ah in aad iska akhriso warbixinta ku saabsan nidaamka Dublin. Haddii aadan heysan qoraallada ku saabsan warbixintaas, waxaad ka heli kartaa bogagga internetka ee Hoggaanka socdaalka ee cinwaankiisu yahay: migri.fi/esitteet. Warbixinnadu waxaa ay ku hoos ku jiraan cinwaanka "Turvapaikka ja Dublin-menettely" Nidaamka Dublin iyo magangelyoddoonista.
- Haddii aad haysato sabab sax ah oo aad ku doonayso in turjubaanka ama waraysi qaadaha uu noqdo qof dumar ah ama nin, waxaad arrinkaas u sheegtaa shaqaalaha xerada qaxootiga wakhti ka horreeya xilliga waraysiga. Xerada qaxootiga ayaa codsigaaga waxaa ay u soo gudbin doonaan Hoggaanka socdaalka (imaagareeshinka). Hoggaanka Socdaalka ayaa qiimayn ku samaynaaya, in sababtaasi ay tahay mid sax ah iyo inkale.
- Haddii xaaladdaada caafimaad ee jir ahaaneed ama nafsad ahaaneed ay tahay mid saamayn ku yeelan karta waraysiga, waxaad arrinkaas u sheegtaa shaqaalaha xerada qaxootiga. Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa haddii aad u oggolaato, waxaa ay inta aan waraysigu dhicin kahor arrinkaaga kala xiriirayaan Hoggaanka socdaalka.
- Hore u soo qaado cuntadaada ama lacag aad cunto ku iibsato.
- Hore u soo qaado wixii daawo ah ee aad maalinkaa u baahan tahay.
- Hore u soo qaado dukumintayada iyo caddaymaha la xiriira codsigaaga.
- Ilmaha ha u soo kaxaysan waraysiga, haddii aan iyaga laftigooda loogu yeerin waraysiga. Haddaad u baahan tahay cid ilmaha kuu haysa xilliga aad waraysiga leedahay, wakhti fiican oo hore u sheeg arrinkaas shaqaalaha xerada qaxootiga.
- Ku imoow wakhtiga laguu qabtay. Kuna soo talaggal wakhti kugu filan oo safarkaaga ah. Shaqaalaha xerada qaxootiga  ayaa ku siinaaya hagista ku saabsan qaabkii aad ku tagi lahayd Hoggaanka socdaalka (imaagareeshinka).

## Waxyaabaha lagaa doonaayo in aad samayso maalinka waraysiga ee Hoggaanka socdaalka dhexdiisa

- Waraysiga dib uma dhigi kartid adigoo aan haysan sabab la aqbali karo. Haddii aad xanuunsato maalinka waraysiga, waxaad arrinkaas sida ugu dhakhsaha badan ugu sheegtaa xeradaada qaxootiga. Wakiilkaaga waa in uu u soo gudbiyaa Hoggaanka Socdaalka, warbixinta xanuunka ama jirrada ee dhakhtarka ama kalkaalisada xeradaada qaxootigu ay qoreen, ugu dambayn 1 toodobaad guddahood laga soo bilaabo maalintii waraysiga. Haddii aad ka baaqato waraysiga magangelyoddoonista adigoo aan haysan wax sabab ah oo la aqbali karo, codsiga waxaa go'aan laga gaari karaa, iyadoo aan la qaadin waraysiga.
- Marka aad timaaddo xarunta Hoggaanka socdaalka, waxaa lagugu samayn karaa baaritaan xagga ammaanka ah.
- Waxaad tustaa waardiyaha Hoggaanka socdaalka, kaarkaaga macmiilka ee xerada qaxootiga.
- Qolka ku sugitaanka ee Hoggaanka socdaalka waxaa imaan kara oo keliya dadka waraysiga loogu yeeray, iyo dadka kale ee hore ballanka ula lahaa Hoggaanka socdaalka.
- Haddii aad doonayso inuu ku soo raaco qof caawiye ah, waa inaad adiga ama qofka caawiyaha ah aad waraysiga kahor arrinkaas qaab qoraal ah u soo weydiisaan Hoggaanka socdaalka. Xaaladaha kale ee arrinkaan ku saabsan qofka waraysiga qaadaaya ayaa go'aan ka gaari kara marka waraysiga la bilaabaayo in qofka caawiyaha ah uu ka qaybqaadan karo iyo inkale. Qofka caawiyaha ah ma ahan qareen ama looyar, kamana qayb qaadan karo caddaynta arrimaha laga hadlaayo.
- Qofka waraysiga qaadaaya waa shaqaalaha Hoggaanka socdaalka. Wuxuu waraysiga kaaga qaadayaa isagoo jooga goobta waraysiga ama wuxuu waraysiga kaga soo qaybgalayaa dhanka fiidiyowga.
- Waraysiga waa la duubayaa. Waxaa intaas dheer oo qolka ku jirta kaamarad wax duubaysa.
- Waraysigu wuxuu qaadan karaa maalinka oo dhan. Inta waraysigu socdo waxaan geli doonnaa biririf ama nasasho qado, haddii loo baahdana waxaa la qaadan karaa xilliyo kale oo biririf ama nasasho ah. Adiga laftigaaga markii aad u baahato waad codsan karaa biririfta ama nasashada.
- Haddii loo baahdo, waraysigu wuxuu sii socon karaa illaa iyo maalin kale. Haddii ay taasu dhacdana waxaa laguu soo diri doonaa waraaq u yeeris ah oo wakhtiga ballanka cusub uu ku yaallo.

## Maxaa ka dhacaaya waraysiga dhexdiisa?

- Marka ugu horraysa qofka waraysiga qaadaaya wuxuu kuu sheegayaa, waxyaabaha la samaynaayo waraysiga dhexdiisa, wuxuuna hubinayaa in aad fahamtay xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga lagugu leeyahay iyo inkale. Haddii aadan waxyaabaha qaarkood fahmin weydii qofka waraysiga qaadaaya. U sheeg haddii aadan fahmin hadalka turjubaanka.
- Haddii aan si dhab ah aqoonsigaaga shakhsiyadeed hore loogu soo caddaynin, qofka waraysiga qaadaaya arrimahaas ayuu marka ugu horraysa ku weydiinayaa. Wuxuu ku weydiinayaa inta xubnood ee qoyskaaga uu ka kooban yahay, halka aad ku nooleyd iyo marinka ama jidka aad u soo martay imaanshahaaga dalkan Finland. Qofka waraysataha ah ayaa kaa caddaysan doona arrimaha saamaynta ku yeelanaaya, in codsigaaga lagu falanqaynaayo Finland iyo in la iska joojinaayo oo aan wax baaritaan ah lagu samaynaynin.
- Intaa dabadeed waxaa la caddayn doonaa sababta aad uga soo carartay dalkaagii iyo sababta aadan ugu noqon karin halkaas. Si daacadnimo leh oo faahfaahsan uga hadal arrimihii adiga kugu soo dhacay.
- Waraysi qaadaha ayaa adiga ku weydiinaaya su'aalo uu ku caddaysanaayo wixii aad u sheegtay ee ku saabsan dhacdooyinkaas. Si daacadnimo leh uga jawaab. Sheeg haddii aadan xusuusan ama aadan garanayn.
- Dhammaan dadka magangelyaddoonka ah waxaa la weydiiyaa su'aalo guud oo la isla ogyahay. Qofka waraysiga qaadaaya wuxuu sidoo kale ku weydiinayaa fikradda aad ka qabto waddan ka saarista iyo u diidista dal soo gelista.
- Hoggaanka Socdaalka waxaa uu waraysiga dhexdiisa kaaga dhegeysan karaa caddaymaha saamaynta ku yeelan kara go'aan ka gaarista arrinkaaga. Tusaale ahaan, haddii adiga lugugu tuhunsan yahay in aad dambi ka gashay Finland ama lagugu xukumay dambi aad ka gaysatay Finland gudaheeda, waxaa arrinkaas uu saamayn ku yeelan karaa falanqaynta arrinka ee Hoggaanka Socdaalka dhexdiisa. Hoggaanka Socdaalka waxaa uu ku siinayaa haddii loo baahdo, fursadda ah in aad waraysiga dhexdiisa ku sheegto fikirkaaga ku saabsan arrinkaas.
- Qofka waraysiga qaadaayaa ayaa adiga kula hubin doonaa qoraalka laga sameeyay waraysiga qayb ahaantiisa ama gabi ahaantiisa, haddii Hoggaanka socdaalka uu u arko in arrinka hubinta ah loo baahan yahay. Haddii qofka waraysiga qaadaaya uusan adiga kula hubin qoraalka laga sameeyay waraysiga gabi ahaantiisa, waxaa laguu qabanayaa wakhtiga kama dambaysta ah ee aad ku soo dirayso wixii sixitaan ama wax ku kordhin ah ee waraysiga la xiriira. Waxaa lagu siinayaa koobiga waraysiga ee aad adigu qaadanayso.

## Qaabkee ayuu Hoggaanka socdaalka ku gaaraa go'aanka?

- Iyadoo lagu salaynaayo codsigaaga ayaa waxaa lagu siin karaa badbaadada caalamiga ah, ama waxaa lagu siin karaa sharciga degganaanshaha ee lagu saleeyay sababo bani'aadminimo oo gaar ah, ama sababta ah in aad soo noqotay dhibbane soo maray ka ganacsiga dadka awgood.

- Hoggaanka socdaalka waxaa uu ku gaarayaa go'aanka arrinkaaga ku saabsan, qaabka ah in uu ku saleeyo macluumaadkii aad ku siisay waraysigii lagula yeeshay, iyo wixii kale ee caddayn ah ee aad u soo bandhigto. Hoggaanka Socdaalku wuxuu sidoo kale macluumaadka muhiimka u ah go'aan gaarista ka raadsan karaa ilaha guud ee macluumaadka.
- Hoggaanka socdaalku waxaa haddii loo baahdo uu dalkaaga ka dalban karaa caddaynta ku saabsan dhab ahaanta ama asal ahaanta dukumintigaaga. Hawlwadeennada dowladda dalkaaga ma ogaanaayaan arrinkaan, caddaynta arrinkaasna wax khatar ah uma keeneeyso adiga iyo ehelkaaga toonna.
- Haddii qofka waraysiga qaadaaya uusan adiga kula hubin qoraalka laga sameeyay waraysiga gabi ahaantiisa, waxaa laguu qabanayaa wakhtiga kama dambaysta ah ee aad ku soo dirayso wixii sixitaan ama wax ku kordhin ah ee qoraalka laga sameeyay waraysiga la xiriira. Waad soo diri kartaa caddaymaha dheeraadka ah ee codsigaaga la xiriira xittaa wakhtiga kama damabaysta ah ee laguu qabtay kaddib, illaa iyo inta aad ka heleyso go'aanka codsigaaga. Waxaad ogaatаa arrinka ah, in caddaymaha dheeraadka ah ee la soo diray wakhtigii kama dambaysta ahaa ee laguu qabtay kaddib aan la awoodin in la tixgeliyo marka go'aanka la gaaraayo. Caddaymaha dheeraadka ah waxaad u soo gudbisaa qaab qoraal ah.
- Haddii codsigaaga la diido ama la kansalo, dib ayaa laguu celin karaa waxaana la amri karaa diidmada dal soo gelista ee ku saabsan, soo gelista dalkaan Finland iyo wadamada uu ka dhexeeyo heshiiska Schngen.
- Haddii codsigaaga la diido ama aad iska kansasho, waxaad xaq u leedahay inaad codsato taageerada dib u laabashada ee ikhtiyaariga ah. Oggolaanshaha taageerada waxaa ku xiran shuruurdo gaar ah oo cayiman, kuwaasoo la hubinaayo marka aad codsato taageerada. Wixii talo ah ee arrinkaas la xiriirta waxaad weydisaa xeradaada qaxootiga ama waxaad faahfaahinta dheeraadka ah ee arrinkaas ku saabsan ka eegtaa bogga la talinta arrimaha dib u laabashada ee Hoggaanka socdaalka [migri.fi/paluu](migri.fi/paluu)
- Sida ugu dhakhsaha badan ugu sheeg hawlwadeennada dowladda waxyaabaha cusub ee suurtaggalka ah ee aad ku salaynayso codsiga magangelyoddoonista, xittaa xaaladaha ay jirto in codsigaaga magangelyoddoonista uusan kuu dalbanayn ama uusan kuu xereysnayn. Haddii aad sida ugu dhakhsaha badan ee aad awooddo u soo gudbin wayso arrimaha ama sababaha cusub, waxaa dhici karta in sababahaas aan wax baaris ah lagu samaynin, haddii codsiga cusub ee magangelyoddoonista ah ee aad samaysay aad ku salayso sababahaas. Waxaa kugu waajib ah in aad haysato wax uun sabab ah, oo sheegeysa sababta aad hore ugu sheegi weyday waxyaabaha cusub ee aad ku salaynayso codsigaaga. Sababtu waa in ay noqotaa, mid aadan adigu awoodin in aad saamayn ku yeelato. Arrinkaa kaddib Hoggaanka socdaalka waxaa uu qiimayn ku samayn doonaa arrinka ah in uu baaritaan ku samaynaayo codsigaaga cusub iyo inkale.